

## Ma ogayd, in uu...

Kela wuxuu qayb ka mid yahay xukunka dowladda iyo shaqaynta taliyaasha.

Sharciga wuxuu dhigaa, Kela-da waxa waajib ku ah, inay arrimahaaga wax ka qabato. Waxaad aamini kartaa in arrimahaagi wax laga qabanayo waqti la yaqaan iyo hore u soconayo si wanaagsan.

Kela waxaad ka heli kartaa talo oo luqaddo fara badan.

Haddii aad arrimahaaga ku ageegsan karin af-finnish, af-iswiidhis ama af-ingiriis, caawis waxaa laga helaa shaqaalaha adeega Kela oo afyaqaan. Haddii luqad isku siman la waayo, Kela wuxuu ku hagaajinaa turjubaan aqoon leh dibadda ka yimid.


Ha imaanin xilliga socdo safmar haddii aad

- ku jirto koox khatar
- hergeb ku haayo
- waxaad ka yimid safar dibadda
- waxaad ku jirtaa karantiin.

---

Su'aallo inta badan la wayddiisto:  
[www.kela.fi/usein-kysyttya-koronasta](http://www.kela.fi/usein-kysyttya-koronasta)

## Saan baa arrimaha Kela guriga ka adeegsan kartaa



Ha imaanin xafiiska adeega Kela-da faa'ido la'aan.

---

Si dheeraad ka akhri: [www.kela.fi/korona](http://www.kela.fi/korona)

**Kela** 

## Maxaan ka adeegsan karaa telefoonka?



- Waxaad heleysaa talo khaas ah.
- Waxaad wayddiin kartaa kaalmeynta Kela iyo sida loo codsado.
- Waa lagaa caawinaa isticmaalka adeega web-ka.
- Haddii macquul ay ahayn si kale aad u adeegto, codsi hadal aad samayn kartaa.
- Waqti ballan qaado, haddii aad rabto in aa lagaa caawiyo buuxitaanka codsiga, ama arimo fara badan la rabo wax in laga qabto aad haysaa.

### Adeega telefoonka Kela, af-soomaali

**020 6344 905**

**isniin, arbaco iyo jimco saacadda 9–12**




Adeega telefoonka wax malaga qabo karo taariikhda codsiga, mala ogo xilliga go'aanka imaan doono. Haddii lagaa rabo wax samayn ama maclumaad dheeraad, Kela wuu kuula soo xiriiraa.

Codsiga iyo lifaaqa aad internet-ka ka soo dirtay, isla markiiba way imanayaan. Wax ka sii badan ka akhri iyo tijaabi: [www.kela.fi/asiointi](http://www.kela.fi/asiointi).

**Ka hubi lambarka adeega web-ka: [www.kela.fi/soita-kelaan](http://www.kela.fi/soita-kelaan)**

## Saan baa waqti xiriir u qaadanaysaa



Waxaad waqti ka qaada kartaa web-ka ama waxaad soo wici kartaa adeega telefoonka. Web-ka waqti balan waxaad ku qaadan kartaa af-finnish, af-iswiidhis ama af-ingiriis.

### Saan aad waqti web-ka ka qaadanaysaa

- 1 Ka fur kombiyuutarka web-browser iyo webpage-ka [www.kela.fi/varaa-aika](http://www.kela.fi/varaa-aika). Klik-garay halka waqti balan qaado.
- 2 Akhri nidaamca sida waqti loo qaado. Klik-garay halka waqti ballan qaado.
- 3 Dalbo nooca adeega oo adeega telefoonka ah, iyo luqadda adeega oo af-finnish ama af-ishwiidhis ah. Dalbo wixii arrinta oo ka mid yahay. Qor sida aad is leedahay waxa arrintaada ee khuseeyso. Klik-garay halka Sii wad.
- 4 Dalbo degmo iyo goobta adeega macmiilka. Marka aad dalbasha samaysadid ka dib iskriinka waxaa ka furmaayo jadwal oo aad ka dalbi kartit waqtika wacitaanka.
- 5 Buuxi maclumaadkaaga iyo sida aad rabdo in lugu soo diro fariinta oo khuseeyo waqtiga ballanta. Klik-garay halka Sii wad iyo Xaqiiji waqtiga ballanta. Waxaa iskriinka ka arki kartaa ogeyn, marka la xaqiijiyo waqtiga ballanta.

**Wax ka sii badan akhri iyo waqti ballan qaado: [www.kela.fi/varaa-aika](http://www.kela.fi/varaa-aika)**